



, wuxuu yiri: qofkii islaama ee wanaag fala loo qaban maayo wuxuu jaahiligii sameeyey, qofkase Islaama oo shirki la yimaada danbigii hore iyo kii dambaba waa lagu ciqaabin

Ibnu Mascuud Allaha raali ka noqdee waxaa laga wariyey inuu yiri: Nin ayaa ku yiri: Rasuulkii Ilaahayow, miyaa naloo qaban wixii aanu waqtigii jaahiliga samaynay, wuxuu yiri: qofkii islaama ee wanaag fala loo qaban maayo wuxuu jaahiligii sameeyey, qofkase Islaama oo shirki la yimaada danbigii hore iyo kii dambaba waa lagu ciqaabin.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Wuxuu cadayey Nabigu naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee fadliga uu leeyahay soo galida Islaamku. Qofka islaama ee ay fiicnaato islaamnimadiisu oo ahaada qof daacada oo runlow ah, loo raacanmaayo wixii macsi ah ee uu sameeyey jaahiligii. qofkase islaamnimadiisu xumaato sida inu munaafiq noqda ama diintiisa ka ridoobo waa lagu xisaabin macsidii uu qaalnimadiisii sameeyey iyo tii uu sameeyey intuu muslimay.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65002>

